


## QABSINKA (Appendix)

Mohamed Ibrahim, MD

### Maxuu yahay:

Qabsinka waa xubin ka mid ah mindhicirka. Waxaa uu ku yaalaa halka uu ka bilowdo mindhicirka wayn midka yarna ku dhamaado. Waxaa lagu tilmaami karaa tubo yar oo hal gees ka xiran afkeedana u furan yahay mindhicirka weyn bilowgiisa. Waa xubin jirka ka mid ah oo aan lahayn waxqabad la sheego. Hadii lagaa jaro waxba kama taweysid iyadoo ay kuu raacayso dhibka uu keeni karo oo kaa haray. Meesha uu qabsinka ku yaalo waxay ku aadan tahay qaska midig dushiisa. Sawiradan hoose bal ka fiiri meesha uu jirka kaga yaalo.



### Astaamaha:

Astaamaha ugu horeeya markuu qabsinka bukoodo waa xanuun ka bilawda hareeraha xudunta, lalabo iyo matag. Qandho way jiri kartaa iyo cunto nacayb. Xanuunka waxuu usii gudbaa dhanka qaska midig dushiisa halkaas oo uu xanuunka isku uruuriyo. Mararka qaarkood xanuunka intuu saa'id noqdo ayuu qofku ka bixiwaayaa in uu foorarsi ku jiro isagoo isu tiigsanaya dhanka midig.

Waxyaalaha lagu qaldi karo xanuunka qabsinka waxaa ka mid ah dhagaxa kiliyaha, eernada (sheelo), infekshanka kaadi haysta, iyo calool xanuun kale. Dumarkana waxaa kusii dheer xanuunka ka yimaada habdhiska ilma galeenka.

## **Maxaa keena:**

Waxyaabo kala duwan ayaa la sheegaa in ay sababaan bukaanshada qabsinka iyadoo ay ku xiran tahay qofba da'diisa. Si kastaba, waxay isugu soo biyo shubtaan iyadoo uu xirmo qabsinka oo saxaradii iyo dheecaankii ku jiray ay halkaa ku xaniiboodaan. Waxaa markaa ku beermaya bakteeriyo farabadan. Xanibaadii waxay keeneysaa in qabsinkii uu sii bararo darbigiisana dhinto. Hadii aan waxba laga qaban bararkii ayaa dilaacinaya oo carunkii wasaqda ahaa ku daadanayo caloosha. Halkaas ayuu isugu badalayaa infekshan wayn.

## **Daaweyntiisa:**

Qaliin uun baa lagu daaweeyaa qabsinka markuu bukoodo. Saan kor ugu sheegay hadii aan laga gaarin intuuusan dilaacin oo infekshankii ku daadinin caloosha, waxuu isku badalayaa infekshan weyn oo dhib aad ah u keeni kara qofka. Inta badan dilaaca (**rupture of the appendix**) waxuu dhacaa markay kasoo wareegato sedex maalmood iyo wixii ka badan. Inta badan qofka markuu xanuunka qabsinka qabto waxuu is keenaa cusbitaalka halkaas oo baaritaan lagu sameeyo. Sheybaarkiisa iyo ogaanshadiisa wax saa usii weyn ma aha oo si sahlan ayaa lagu ogaan karaa qaasatan qofka labka ah. Hase ahaatee waayadan waxaa qofka la saaraa raajada CT -iskaanka (khaasatan halkan Amerika) taas oo inta badan tusta dhibka taagan.

Qaliinka qabsinka waxaa loo sameeyaa labo nidaam. Midka ugu badan horena loosameeyn jiray waa midka habka furan (**open appendectomy**). Waxaa jeexid yar oo qaliin ah lagu sameeyaa qaska midig in ka yara sareysa halkaas oo qabsinka laga soo saaro marka laga soo jaro mindhicirka. Qofka maalinta labaadba cusbitaalka waa ka soo baxaa hadii uusan qabsinka ku dilaacin. Hadii uu ku dilaaco waxay noqonaysaa in uu mudo cusbitaalka joogo ilaa uu infekshanka ka dhamaanayo. Nidaamka kale waa midka cusub ee kaamerada lagu sameeyo (**laparoscopic appendectomy**). Nidaamkan waxuu faa'iido yar u leeyahay haweenka oo laga baqo in cadaaynta bukashada qabsinka shaki ku jiro iyo dadka aad u buuran. Marka kuwaa laga reebo, inta badan waxaa la door bidaa nidaamka furan.

Qaliinka ka gadaal, qofka sidiisii hore ayuu kusoo noqonayaa oo mar hadii laga soo bogsado nabarka qaliinka wax iska bedelaya qofka ma jiro. Qofka waa in uu caadigiisii hore u dhaqmaa oo uusan waxba ka wel welin oo quseysa caloosha iyo qabsinkii lajaray.

## **OGAYSIIS (DISCLAIMER):**

Darsigan iyo warbaahintaas kor ku xusun looguma talagelin in lagu sheybaaro ama daweyyo shaqsi. Fadlan la xiriir dhaqtarkaada hadii ay astaamo la mid ah ku hayaan.